



RÄTTSMEDICINALVERKET



**Da'-qiimeynta la
xiriirta caafimaadka**

– sidan ayey wax u dhacayaan

Waxaad Swiidhan ka dalbatay gabbaad, waxaadna u baahantahay inaad tustid aqoonsigaaga. Magacaaga, goorta aad dhalatay iyo halka aad ka timid waa qeyb ka mid ah cidda aad tihid – aqoonsigaaga.

Adigaaga raadsanaya megengelyada, kana yar 18 jirku waxaad tahay carruur sida waafaqsan sharciga swiidhishka. Sidaas darteed waxaad leedahay xuquuq gaar ah, oo ay ka mid yihiin xaqa qof sharci ahaan mas'uul kaa noqda, daryeel caafimaad iyo dugsi. Dadka waaweyn waa in marka ay gaarayaan go'aan adiga ku taabanaya ay tix geliyaan waxa aad leedihid.

Haddii aadan haysan waraaqo caddeynaya da'daada, waxaad markaas xaq u leedahay inaad sameysid da'-qiimeyn la xiriirta caafimaadka si ay u taageerto da'da aad sheegtay.

Swiidhan

dhammaan

**kuwa ka yar-yar 18 jirka waxay
xaq u leeyihiin in ay dugsi dhigtaan.**



Haa ama maya

In la sameeyo da'-qiimeyn la xiriirta caafimaadku maaha wax khasab ah. Taasi waxay ka dhigantahay in aadan u baahneyn inaad taas sameysid haddii aadan dooneynin. Haddii aad dooneysid inaad sameysid da'-qiimeyn la xiriirta caafimaadka waxaad u baahantahay inaad dhiibtid oggolaasho qoraal ah oo adiga iyo cidda sharci ahaan mas'uulka kaa ah aadan saxiixdeen.

Waad is beddeli kartaa oo waad la noqon kartaa oggolaashadaada. Haddii aad dooneysid inaad is beddeshid, qofka sharci ahaan ka mas'uulka ah ayaa Hey'adda socdaalka la xiriiraya. Sidaas waxaad adiga iyo qofka sharci ahaan kaa mas'uulka ah sameyn kartaan ilaa iyo inta ay Hey'adda caafimaadka caddaaladdu ay Hey'adda socdaalka uga keeneyso jawaabteeda, faallo la xiriirta caafimaadka caddaaladda oo ku aaddan da'da.

Lababaaritaan

Da'-qiimeynta waxaa lagu saleynayaa lababaaritaan oo aad sameyneysid.

Waa in aad tagtaa rugta qaabiliaadda dhakhtarka ilkaha halkaas oo gows caqligaaga la raajiyeynayo. Sawirrada ayuu dhakhtarka ilkuhu ka arki karaa ilaa heerka ay ilkuhu horuumarsanyihiin.

Waa in aad sidoo kale tagtaa rugta qaabiliaadda raajiyada halkaas oo laabatooyinka jilbaha lagu baarayo kaamiro bir lab ah. Dhakhtar xagga raajiyada ah ayaa fiirinaya haddii laabatada jilibku ay si dhameystiran u kortay.

Baaritaannadu wax lacag ah kuuguma kacayaan.

Badanaa ma jiraan wax baahi ah oo turjumaan loo qabo marka baaritaanka la sameynayo. Haddii sidaas oo ay tahay aad turjumaan baahi u qabtid waxaad fursad u heysataa in aad sheegtid marka aad baaritaanka waqtii u qabsaneysid.

Sawirrada raajiyada ee

gowsaska caqliga iyo

sawirkka kaamirada bir

labka ah waxay qeyb ka yihiin da'-qiimeynta la xiriirta caafimaadka.



Qiimeynta

Haddii aad ka sarreysid 18 jir gows caqligaagu badanaa si dhameystiran ayuu u koray, laabatooyinka jilbahaaguna si dhameystiran ayey u koreen. Haddii aad ka hooseysid 18 sano qeybahaas jirku weli wey korayaan.

Faallada caafimaadka caddaaladda

Baaritaannada iyo qiimeynta gows caqliga iyo laabatada jilibka ka dib dhakhtar xagga caddaaladda ah ay jawaab da'daada ka soo saaraya. Jawaabta waxaa loogu yeeraa faallada xagga da'da ee caafimaadka caddaaladda.

Si sugar looma dhihi karo inta sano ee aad tahay. Faalladu waa qjimeyn ku aaddan haddii aad ka sarreysid ama ka hooseysid 18 sano jir.

Hey'adda caddaaladda ee la xiriirta caafimaadku waxay faallada da'da ku aaddan u direysaa Hey'adda socdaalka.



Dhakhtar

caddaaladeed ayaa

da'daada jawaab ka soo


saaraya. Waxaa loogu yeeraa
faallada caafimaadka caddaaladda.

Macluumaad muhiim ah ka horbaaritaanka kaamirada birlabka ah

Baaritaanka laabatada jilibka ka hor waxaa muhiim ah in la ogaado haddii wax bir ah ay jirka ku jiraan, tusaale ahaan boolal qalliin ka bacdi ah ama firir bir ah. Haddii ay sidaas tahay waxaa jirta khatar ku aaddan sameynta baaritaanka kaamirada birlabka ah. Wuxaad buuxin kari doontaa foom su'aalo ah inta aadan sameynin baaritaanka.

Baaritaanku khatar kuguma aha adiga ama caafimaadkaaga, wax xanuun ahna ma laha. Wuxuu qaadanaya ku dhawaad 5–10 daqiqo. Si uu baaritaanku mid fiican u noqdo waa muhiim in si gebi ahaanba aan dhaqdhaqaaq lahayn aad u jiiftid. Marka aad baarintaanka sameyneysid maaha in ay dharkaaga ku jiraan wax bir ah. Waad iska siibi doontaa surwaallada lugo dhaadheerka ah iyo kabaha. Maaha qof dumar ah ahaan in aad heysatid rajabeetoojin.

Mashiinku wuxuu leeyahay cod dheer sidaa awgeed waxaad haysan doontaa samaacado dhegaha ah oo ay muusiko ku jirto.



Waxa kan waa in aad u qaadatid baaritaannada:

- U yeeritaanka aad warqad ahaan u heshay
- Foomkaagi su'aalaha oo buuxsan baaritaanka kaamirada birlabka ah ka hor
- Kaarkaaga LMA-ga
- Cidda sharci ahaan ka mas'uulka ah waa in ay baaritaanka kuu soo raacdaa, soona qaadataa kaarkeeda aqoonsiga ah.

TALLAABBA TALLAAB: Da'qiimeyn la xiriirta caafimaadka



Hey'adda socdaalku waxay kuu sheegeysaa inaad fursad u leedihid inaad sameysid da'qiimeyn la xiriirta caafimaadka. Adiga, iyo wadajir ahaan cidda sharci ahaan kaa mas'uulka ah, waxaad ama leediihiin haa ama maya.



Hey'adda socdaalka ayaa da'qiimeyn la xiriirta caafimaadka ka dalbaneyesa Hey'adda caafimaadka caddaaladda.



Gowsahaaga caqliga waa la raajiyeeyayaa. Cidda sharci ahaan kaa mas'uulka ah wey ku soo raaceysaa.

1

V

2



Haddii aad haa tiraahdid, waxaad Hey'adda socdaalka u gudbineysaa oggolaasho qoraal ah.

Xitaa cidda sharci ahaan kaa mas'uulka ah wey saxiixeysa foomka.

3

V

4



Waxaad Hey'adda caafimaadka caddaaladda ka heleysaa laba warqadood oo loogu yeero u yeeritaan. Halkaas oo ay ku qorantahay halka iyo sida aad waqtio baaritaan u qabsaneysid. Xitaa cidda sharci ahaan kaa mas'uulka ah wey heleysaa waraaqahaas. Adiga iyo cidda sharci ahaan kaa mas'uulka ah ayaa ballamo qabsanaya si loo sameeyo baaritaannada. Waxaa la sameynayaa laba jeer.

5

V

6



Qaar ka mid ah laabatooyinka jilibka waxaa baareysa kaamiro birlab ah. Cidda sharci ahaan kaa mas'uulka ah wey ku soo raaceysaa.



Laba dhakhtar oo ilko aaya fiirinaya sawirrada raajiyada ee gowsahaaga caqliga, midba goonidiisna ayuuna qiimeyn ugu sameynaya koritaanka ilkhaa.

7

v



Natijjada waxaa Hey'adda caafimaadka caddaaladda loogu dirayaan dhakhtar caddaaladeed.

9

v



Laba dhakhtar oo raajijo aaya fiirinaya sawirrada kaamirada birlabka ah ee laabatada jilibka, midba goonidiis ayuuna qiimeyn ugu sameynaya koritaanka laabatadaada jilibka.

8

Hey'adda caafimaadka caddaaladdu waxay faallo u direysaa Hey'adda socdaalka.



11

v



Dhakhtarka caddaaladda ayaa waxa fiirinaya iyo qiimeynta ay sameeyeen. Dhakhtarka caddaaladda ayaa dabadeed sameynaya faallo la xiriirta caafimaadka oo leh qiimeyn haddii aad ka hooseysid ama ka sarreysid 18 jir.

12

7

Hey'adda socdaalku waxay, si ay u qiimeyso da'daada, si wadajir ah u isticmaaleysaa faallada Hey'adda caafimaadka caddaaladda iyo macluumaadka kale ee ku aaddan da'daada ee aad adigu bixisay.







Filin ku aaddan da'-

qiimeynta ka daawo

www.rmv.se



RÄTTSMEDICINALVERKET

www.rmv.se